

Soomaalidu waxaa ay ku nool yihiin xaalado maciishadeed oo culus. 43% dadku waxaa ay ku nool yihiin wax ka yar 1 doolarka mareykanka ah maalintii; waxaana 73% ay ku nool yihiin wax ka yar 2 doolarka mareykanka ah maalintii. 65% dadweynaha waxaa ay ku nool yihiin xawaalado ay qaraabadooda uga soo diraan dibadda, beero-falasho iyo xoolo-dhaqasho, iyada oo xirfadaha mushaaraad lagu heli karna ay yar yihiin. Waaxda kalluumeysiga waa mid aan si wanaagsan u kobcin waxaana culeys ku noqdey meel lagu keydiyo iyo gaadiidka oo ku yar.

Demographic Information	Very Poor	Poor	Middle	B
Boqolleyda dadka oo loo qaybiyey xoolahooda	10	30	45	
Dadka	5,910	17,730	26,600	
Celceliska inta qof ee qoyskiiba ka kooban yahay	7		8	

Isha laga heley: UNDP Somalia, 2005

Xaaladda haqab-beelka cuntada ayaa sii xumaaneysa taas oo ka dhalatey saameynta isbiirsatey ee meertada roobka yar, xoolaha dhammaadey, tirada xoolaha suuq-galka ah oo yaraatey, wax-soo-saarka caanaha oo yaraadey iyo qiimaha badarka oo aad u kordhey. Fursado maciishadeed oo kale oo aan jirin, kuwaas oo ay la socdaan fursadaha waxbarasho iyo kuwa shaqo oo yar ayaa uga sii daraya xaaladda, kuwaas oo saameyn culus ku yaalanaya guud ahaan dadka gaar ahaan dhallinyarada.

Dadallada maciishadda la xiriira ee CISP



Sanadkii 2009kii, CISP waxaa ay ballaarisay baaxadda hawsha ay ka waddo bartamaha Soomaaliya (Galgaduud iyo Koonfurta Mudug) si ay u taageerto maciishadda dadka jilicsan ee beeraleyda-xoolo-dhaqatada ah, kaluumeysatada iyo bulshooyinka Dadka Gudaha Ku Barokacay, oo ku dhex nool xaalad iskahorimaad dabadheer iyo degganaan la'aan siyaasadeed. Ujeeddada CISP ay arrintan ka leedahay waa in ay bixiso taageero degdeg ah, oo uu la socdo xal waara oo dhinaca waaxaha beeraleyda-xoolo-dhaqatada ah iyo kaluumeysiga. Intaa waxaa dheer, barnaamijka CISP waxaa uu ku wajahan yahay ganacsi-abuurayaasha Soomaaliyeed ee dhallinyarada ah oo doonaya in ay ganacsiyadooda ay badiyaan ama ay bilaabaan hawlo cusub oo dakhli soo geliya.

Khariidadda waxqabadka maciishadda ee CISP



> Click on the Map

¹FNSAU 2010